

Waa maxay doorka adeegahaaga bulshada?

Adeegahaaga bulshadu wuxuu kugu wargelin khataraha badbaadada la aqoonsaday kuwaasi oo u horseedaya ilmahaaga in lagu meeleeyo daryeelka gurigda dibaddiisa. Way kula shaqayni doonaan si ay u qiimeeyaan baahiyahaaga kaagana caawiyaan adeegyada si ay shiishka u saaraan dhimista ama suulinta khataraha.



Waa Maxay Codsiga Ku-tiirsanidu?

Codsi ku-tiirani waa codsi qoran oo maxkamadda ku socda oo khuseeya arrimaha in ilmahaaga lagu gabboodfalay, dayacay ama laga tagay oo ayna jirin waalid awooda inuu si badbaado leh u daryeelo ilmahaaga. Codsiga ku-tiirsanaantu wuxuu waydiiyaa maxkamadda inay soo farogaliso oo ka dhawro ilmahaaga dhaawac Gobolkuna uu qaado hayn sharci ah oo kumeelgaadh ah ee ilmahaaga. Codsiga ku-tiirsanaanta waxa buuxiya Children's Administration (Maamulka Carruurta) marka ilme la rumaysan yahay inay ku imanayso ama ku sugan yahay khatar. Carruurta guriga ayaa lagu celiyaa marka khataraha badbaado ee la aqoonsaday si badbaado leh loogu xakamayn karo maarayna karo guriga qoyska.

Qareenka

Waxa aad xaq u leedahay qareen. Haddii aanad shaqaalaysiin karin qareen gaar kuu ah dakhligaaga dartii, maxkamadda ayaa mid kuu magacaabi.

CASA/GAL

CASA (Qareenka Qaaska ah ee ay Maxkamadu Qabato) iyo GAL (Wakiilka Lagu Daro) waxa magacaaba qaadiyo si ay ugu doodaan ilmahaaga.

CASA ama GAL wuxuu ugu sheegaa qaadiga dhagaysiga maxkamadda waxa uu rumaysan yahay inay u danta ugu fiicani ugu jirto ilmahaaga iyo waxa ilmahaagu u baahan yahay. CASA ama GAL waxay ka shaqayn si ay u hubiyaan in ilmahaaga aalaaba laga la tixgaliyo go'aan kasta oo maxkamaddu qaadanayso.



Lala Xidhiidhayaasha Muhiimka ah

Magaca Adeegaha Bulsho:

Ma u Baahan Tahay Qareen?

Xafiiska La-taliyaha loo Xilsaaray:

Xafiiska Difaaca Dadwayanaha
taleefan: 360-586-3164
iimayl: opd@opd.wa.gov

Magaca iyo taleefanka CASA/GAL:

> **Difaaqaha Qoyska iyo Carruurta** wuxuu baadhaa cabashooyinka ku saabsan tallaabooyinka ama kuududka wakaaladda ee ku lugta leh ilme ama waalid ku lug leh adeegyada dhawrista ama daryeelka ilmaha.

Telefoon bilaa lacag: 1-800-571-7321
Taleefan: (206) 439-3870

> **Khadka Tooska ah ee Maamulka Carruurta**

Wac 1-866-ENDHARM (1-866-363-4276)

Khadka tooska ah ee 24 saac/toddoba maalmood usbuuca kaasi oo si toos ah kuugu xidhaya xafiiska deegaanka ee habboon.

> Sidoo kale waxaad la xidhiidhi kartaa **Xafiiska Maamulka Carruurta ee Xidhiidhada Kaqayb Ahaanshaha** 1-800-723-4831 si aad u fahamto habka rasmiga ah ee cabashada.



Fahmidda Habka Ku-tiirsanaanta Maxkamadda



Waxa aad xaq u leedahay:

- In laguula dhaqmo si qaddarin leh
- Ogaato waxa ka dhacaya kiiskaaga iyo ilmahaaga
- Macluumaadkaaga qarsoodi laga dhigo

Waxaa ku saaran inaad:

- Ka qaybqaadato kulmada qorshaynta la wadaago ee kusaabsan halka aad rabto in ilmahaagu ku noolaado
- Booqato ilmahaaga
- U sheegto adeegahaaga bulshada isbeddelada lambarka taleefankaaga iyo ciinwaankaaga
- Aad sharraxdo waxa aad u baahan tahay si aad u noqoto waalid badqaba

Doorkaagu waa in:

- Aad muujiso doonista qorshaynta ilmahaaga
- Ka hadasho kuna lugyeelato qorshaha kiiskaaga

Muhiim u ah ogaanshiyo

Xilliga kasta inta maxkamaddu socoto, qaadi wuxuu go'aansan karaa in ilmahaaga si badbaado leh loogu celin karo guriga. Hase yeeshee, haddii aanad awoodin inaad samayso isbeddelada lama-huraanka u ah ilaalinta badbaadada ilmahaaga, waxaad dhumin kartaa xaqa waalidnimo ee ilmahaas. Maamulka Carruurta wuxuu ku siin taageero iyo adeegyo si uu kaaga caawiyo inaad ka dheeraato sidan ood dib ula midowdo ilmahaaga.

Jadwalka Habka Ku-tiirsanaanta Maxkamadda

Fadlan hubi inaad kala hadasho qareenkaaga dhagaysigaaga maxkamad.

Gudbinaha CPS Habku halkan ayuu ka bilaabmayaa	Ilmaha waxa lagu meelaynayaa Hayn Dhawrised	Dhagaysiga Daryeel Hooyga (ilmahaaga waxa lagu soo celin karaa guriga kadib wax kamid ah dhagaysiyada maxkamadda la taxay)	Si Waday Dhagaysiga Daryeelka Hooyga (maxkamadaha qaar)	Dhagaysiga Xaqiiqo Raadiska (75 maalmood gudahood ee fayl garaynta Codsiga Ku-tiirsanaanta)	Nooca Dhagaysiga (90 maalmood gudahood ee faylgaraynta Codsiga Ku-tiirsanaanta)	Dhagaysiga Dib-u-eegista Ku-tiirsanaanta Koowaad	Dhagaysiga Qorshaynta Rasmiga	Dhagaysiga Dib-u-eegista Ku-tiirsanida (Socda lix bilood kasta)
	72 saac ugu badnaan		30 maalmood	90 maalmood		6 bilood	12 bilood	18 bilood
CPS waxay heshay gudbin la xidhiidha gaboodfal ama dayac ilme. Gudbinta waa la qiimaynayaa ama waxa loo baadhayaa baadhis ama shaandhayn. Ilmaha waxa ka qaadayaa guriga CPS ama sharci fulinta haddii la rumaysan yahay inay lama-huraan u tahay in laga ilaaliyo ilmaha waxyeelo wayn.	Ilmaha waxa laga qaadayaa daryeelkaaga waxaana lagu meelaynayaa daryeelka dibadda guriga oo ah qaraabo ama guriga barbaarin. Dhagaysiga Hooy Daryeel waxa lagu hayn 72 saac marka ilmahaaga laga qaado gurigaaga.	Dhagaysigan waxa aad waydiisan kartaa kuu magacawdo qareen. Qaadi wuxuu go'aamiyaa haddii ilmahaagu u baahan yahay ku nagaashaha daryeelka dibadda guriga ama si badbaado ah lagu soo celiyo. Waxaad waydiisan kartaa in ilmahaagu la joogo qaraabo halkii guriga barbaarinta. Haddii ilmahaagu ku nagaan doono daryeelka adeegahaaga bulshadu wuxuu abuurii qorshe booqasho oo joogto ah.	Maxkamadu waxay markale go'aamin haddii ilmahaagu uu joogi doono daryeelka dibadda guriga ama lagugu soo celin doono. Maxkamadu waxay dib-u-eegi qorshahaaga booqashada iyo halka ilmahaagu ku nool yahay.	Haddii aad sii waddo diidmda ku-tiirsanaanta, maxkamaddu waxay ka qaadani marag-fur adiga iyo kuwa kale ku saabsan khataraha badbaadada ilmaha ee lagu aqoonsaday codsiga ku-tiirsanaanta. Maxkamadu waxay mid ahaan xukumi in ilmahaagu ahaado ku-tiirsane gobolka ama amarto in ilmahaaga lagu soo celiyo daryeelkaaga oo ay caydhiso ku-tiirsanaanta ama ay amarto ilmahaagu inuu badqabo haddii uu guriga tago isagoo leh ku-tiirsanida guriga dhexdiisa iyadoo maxkamaduna dusha kala soconaysa.	Haddii ilmahaaga la caddeeyo inuu ku-tiirsane yahay, maxkamadu waxay amri inaad ka qaybqaadato adeegyada si aad u dhinto khataraha badbaado gurigaaga. Maxkamadu sidoo kale waxay xallin wixii meelayn ama booqasho ah dhagaysigan.	Maxkamadu waxay dib-u-eegtaa horumarkaaga adeegyada waxayna tixgalisaa hadday jiraan adeegyo dheeraad ah kuwaasi oo xoojin kara awoodaada siinta guri badbaado leh ilmahaaga. Maxkamadu waxay go'aamin kartaa in imika ay badbaado u tahay ilmahaagu inuu ku laabto guriga la jirka ku-tiirsanida guriga iyadoo maxkamaduna dusha kala soconayso.	Maxkamadu waxay go'aansataa waxa uu noqon dono qorshaha rasmiga ah ee ilmahaagu iyo sidoo kale waxay uu ay tahay inuu noqdo qorshaha israacsan ee ilmahaagu haddii aanad awoodin inaad si badbaado leh u barbaariso ilmahaaga.	Maxkamadu waxay dib-u-eegtaa kaqaybqaadashaada adeegyada iyo haddii aanad samayn horumar ku filan halkan, maxkamadu waxay amri (xaaladaha qaar) in Gobolku fayl gareeyo codsi in la joojiyo xuquuqdaada waalidnimo. Haddii codsiga joojinta lafayl gareeyo waxa jiri doona dacwad halkaasi oo qareenkaaga iyo qareenka Gobolku ay keeni doonaan caddayn kusaabsan kiiskaaga. Qaadi ayaa go'aamin doona haddii la joojinayo xuquuqdaada waalidnimo iyo haddii kale.

Kulamada Qorshaynta la Wadaagay

Ku lugyeelashadaada dhammaan kulamada qorshaynta la wadaagay ee Maamulka Carruurta waa muhiim. Waxaad caawin doontaa kobcinta qorshaha kiiska qoyskaaga si aad u suuliso khataraha uguna abuurto ahdaaf rasmi ah ilmahaaga.

Go'aan Qaadashada Kooxda Qoyska (FTDM)

Kulamada FTDM waxay dhacaan inta uu socdo kiis oo dhan. Waxay isku keenaan xubnaha qoyskaaga oo taageeraan sidoo kalena xirfadlayaasha ku lugta leh si ay u sameeyaan talobixino la xidhiidha meelaynta kumeelgaadhka iyo rasmiga ah ee ilmahaaga.

Kooxaha Dhawrista Ilmaha (CPT)

Kooxaha Dhawrista Ilmaha waxa ka mid ah dhakhtar, shaqaale dugsi, xirfadlayaal caafimaadka maskaxda iyo xirfadlayaal beeleed kale. Si wadajir ah dadkani waxay siiyaan la-talin iyo talobixino qarsoodi ah Maamulka Carruurta la xidhiidha kiisaska ay jiraan khatar wayn oo ku fool leh ilme lix jir ama kayar ah, ama kaasi oo ay jiraan muran kusaabsan baahida meelaynta dibadda guriga.

Qorshaynta Rasmiga iyo Israaca ah

Marka lagu daro kaala shaqayntaada dhimista ama suulinta khataraha, shaqaalaha Maamulka Carruurta waxay kaala shaqayn kobcinta ahdaaf qorshaha kiiska ee daryeelka muddada gaaban iyo dheer ee ilmahaaga. Hadafkayaga ugu wayni waa inaanu ku soo celino ilmahaaga daryeelkaaga, laakiin sidoo kale waa inaanu yeelanaa qorshe (israacsan) kale haddii ahdaafta qorshaha kiiska aan la kasban.

Guddida La-talinta Daryeelka Ilmaha Hindida Deegaanka (LICWAC)

Haddii adiga ama ilmahaaga loo aqoonsado Maraykan Asal ah ama ugu dhawaan Maraykan Asal ah kiiskaaga waxa dhici karta inay shaqaale ka noqdaan Guddida La-talinta Daryeelka Ilmaha Hindida Deegaanka. LICWAC waa koox mutadawiciin ah kuwaasi oo ka shaqeeya la talina ka sameeya kiisaska CA marka xaaladdaada Maraykan Asal ah aan wali la go'aamin ama marka qabiilka ilmuhu aanu jirin.